

# TB

## HA SUGIN ILAA UU KA KACO...

Cudurka qaaxada (TB) waa cudur culus oo sababa bakteeriyada qaaxada ee hawada ku faafo. Waxaad ku jirtaa halis ka badan haddii:

- xiriir la leedahay waddan si caadi ah laga helo cudurka qaaxada
- taqaano qof qaba, ama lahaan jirey cudurka qaaxada
- leedahay difaaca jirka oo hooseeya
- ku nooshahay guri buux-dhaaf ah ama leh haawo siin liita



# Qaaxada Firfircoon


- Bakteeriyada qaaxada way 'soo jeedaan'
- waxaad dareemi doontaa xanuun
- waxaad qaaxada u gudbin kartaa dadka kale

Astaamaha:  
**qufac, qandho,  
miisaan lumis,  
gaajo la'aan, dhidid  
habeenkii, daal**



# Qaaxada Qarsoon

- Bakteeriyadu waa 'hurdaa'
- ma dareemaysid xanuun
- qaaxada uma gudbin doontid dadka kale



Waxaad haysataa 1 ilaa 10 fursad inuu kugu dhaco qaaxada firfircoon



THE  
TRUTH  
ABOUT  
TB

**Think TB (Ka Feker Qaaxada)** – ogaanshaha hore iyo daweynta ayaa muhiim ah haddii aad qabtid qaaxada firfircoon

**Iska baar iyo iska daawey qaaxada qarsoon** – ka hortagga ayaa ka fiican daaweynta

---

Haddii aad ka walaacsan tahay qaaxada, la hadal GP-gaaga. Si aad u ogaato wax ka badan ee ku saabsan cudurka qaaxada ama si lagugu caawiyo diiwaangelinta GP'ga, booqo:

[www.thetruthabouttb.org](http://www.thetruthabouttb.org)